# Liisanka Daryelka Xanaada Daryeel-bixiyayaasha Rixinka



## Waa maxay daryeelka rixinku?

The Department of Children, Youth, and Families (Waaxda Caruurta, Dhalinyarada, iyo Qoysaska, DCYF) waxay u isticmaashaa kalmada "kinship care" (daryeelka rixinka) daryeelka labada galin ee cunugu ka helo qaraabada iyo dadka kale ee ku haboon. "Suitable others" (dadka kale ee ku haboon) waxa looga jeedaa qaraabada aan ahayn. Daryeelka rixinku wuxuu siiyaa kab caruurta, waxaanay kala kulmi karaan caqabado gaara daryeel-bixiyayaasha qaraabada iyo rixinka aan ehelka ahayn ee daryeelka siiya. DCYF waxa ka go'an inay ku caawiso markaad daryeelaysid cunuga rixinka. Khayraadkani wuxuu ku siinayaa macluumaadka helida liisanka.

## Maxaan liisan la iigu siinayaa inaan daryeelo cunuga rixinkayga?

Daryeel-bixiyayaasha waxa aad loogu dhiirigalinayaa inay liisan helaan; haseyeeshee, maaha shuruud. Inaad liisan haysatid waxay siinaysa caawimo dheeriya sida lacag dibu-bixinta bilaha ee kharashaadka la xidhiidha daryeelka cunuga ku jira xanaanada. Haddii aad tahay qaraabada cunuga daryeelka ku jira, waxaad sidoo kale ku haboonaan kartaa ka dhaafka liisanka si aad u heshid liisanka. Akhri si aad waxbadan uga ogaatid kabka helida liisanka.

- Waalidiinta xanaanada rixinka waxa loo xilsaaraa Shaqaalaha Qeybta Liisanka oo ka caawin kara su'aalaha iyo baahiyaha kale ee daryeelka xanaanada cunuga.
- Dhamaan daryeel-bixiyayaashu waxay ka heli karaan tababar wanaagsan shuraakada Alliance for Child Welfare Excellence (Isbahaysiga Xanaanada Caruurta), lakiin daryeel-bixiyayaashu waxay heli karaa tababarka gaar ahaan loogu talo galay khibrada gaarka ah.
- Magdhowga daryeelka xanaanada wuxuu siiyaa xadiga ugu badan ee caawimada dhaqaale ee DCYF bixin karto. Magdhowyadan waxay ka sareyaan deeqda laga helayo Temporary Assistance to Needy Families (Caawimada ku Meelgaarka ah ee Qoysaska Baahan). Heerarka Julaay 1, 2021, waa:

| Heerka Asaasiga ee Magdhowga Daryeelka Xanaanada | |
|---|---|
| Da'da Cunuga ama Dhalinyarada | Magdhowga Bilaha ee Cunugkasta |
| 0 ilaa 5 sano | $672.00 |
| 6 ilaa 11 sano | $796.00 |
| 12 iyo ka weyn | $810.00 |

| TANF Kabka ugu Badan | |
|---|---|
| Cabirka Qoyska | Wadarta Magdhowga Bilaha |
| 1 | $417.00 |
| 2 | $528.00 |
| 3 | $654.00 |
| 4 | $771.00 |
| 5 | $888.00 |

Heerarka magdhowga daryeelka xanaanada way badnaan karaan iyadooy ku xidhan tahay heerka daryeelka ee baahiyaha cunuga.

- Qorshaha Magdhowga Waalidka Daryeelka iyo Dayntu wuxuu caawin karaa bixinta lacagta khasaaraha iyo dhaawacyada uu sababay cunug kula jooga oo aan ku jirin caymis gaara.
- Daryeelka Fidsan ee Xanaanada (18 ilaa 21 sano) wuxuu u saamaxayaa magdhowga daryeelka xanaanada ee waalidka xanaanada rixinka ee daryeelaya dhalinyarada ka weyn 18 kuwaasoo raba inay kusii jiraan daryeelka xanaanada inuu ka caawiyo kala guurka da'da.

Washington State Department of
CHILDREN, YOUTH & FAMILIES

## Tababarkee ayaa loo baahn yahay?

- Gargaarka Degdega/CPR
- Xanuunada Dhiiga ku Dhasha
- Tababarka Liisanka
- Tababarka Daryeel-bixiyaha

## Miyaa caawimada dhaqaale ama caawimo kale loo heli karaa nidaamka liisanka?

Akhrinta iyo ka fikirka shuruudahan waxay u muuqan karaan qaar culus. Helida liisanku waa nidaam, hadafkeenuna waa inaan kaa caawino dhamaan hawsha. Shaqaalaha Qeybta Liisanka ayaa caawin kara xalinta caqabadaha liisanka iyagoo soo iibinaya alaabaha loo baahan yahay sida sanduuq xidhayaasha iyo dabdamiyayaasha. Haka baqan inaad weydiisid shaqaalaha Qeybta Liisaanka caawimo haddii dhib jirto.

Barnaamijka Caregiver Retention, Education and Support (Haynta Daryeel-bixiyaha, Waxbarashada iyo Caawimada, CaRES) wuxuu ku caawin karaa dhamaan wakhtiga hawlahaaga daryeelka xanaanada, sidoo kale.
Booqo: **alliancecarescommunity.org** ama
iimayl udir **alliancecares@uw.edu** si aad waxbadan uga ogaatid!

## Sug! Waxaan rabaa in caruurtani guriga ugu tagaan waalidkood. Tani lama filaayo inay noqoto mudo dheer, hadaba maxaan u marayaa nidaamkan oo dhan?

Waxaanu kaa caawinaynaa rabitaankaaga in cunuga rixinku aado guriga. Xaqiiqatan, dibula midowgy waa hadafkayaga koobaad uguna muhiimsan, lakiin waanu ognahay in marmarka qaar waalidku u baahan karo caawimo dheeriya ama wakhti uu ku barto xirfado cusub. Xataa haddii aad u maleynaysid in cunuga rixinkaagu kula joogayo mudo kooban, waxaanu kugu dhiirigalinaynaa inaad heshid liisan oo aad bilowdid ka faa'idaysiga caawimada laga helaayo liisanka.

## Su'aalaha Badanaa La Is-Weydiiyo

### Yaa codsan kara inuu noqdo waalidka xanaanada?

Dadka kasoo jeedi dhamaan jinsikasta/isir/dhaqan iyo diinkasta, kiraystayaasha iyo xaqlayaasha guryaha, dadka loo yaqaan LGBTQIA+, dadka leh heerkasta oo waxbarasho, dhamaan waa lagusoo dhaweynayaa inay codsadaan!

### Miyey jiraan shuruudo dakhli si loo helo liisanka waalidka xanaanada rixinka?

Haa. Waxaanu qiimeynaa xaaladaada dhaqaale inta lagu jiro nidaamka daraasada guriga, waanan ognahay in daryeel-bixiyayaasha rixinku la kulmaan caqabado dhaqaale oo gaara oon la filayn markay go'aansadaan inay daryeelaan cunug ehelka ah. Waxaanu rabnaa inan hubino inaad buuxin kartid baahiyaha dhaqaale ee qoyskaaga adoon ku tiirsanayn magdhowga daryeelka xanaanada. Ka dhaafka ayaa loo sameyn karaa shuruudan daryeel-bixiyayaasha rixinka.

### Ma inaad noqoto muwaadin Mareykan ah ayaa waajiba si aad u heshid liisanka waalidka xanaanada rixinka?

Maaha shuruud inaad heshid muwaadinimada Mareykanka si aad u noqotid daryeele liisan haysta. Haseyeeshee, adiga ama qof kula codsanaya liisanku waa inuu haystaa Individual Taxpayer Identification Number (Lambarka Aqoonsiga Cashuurta Shakhsiga, ITIN) si uu u helo magdhowga daryeelka xanaanada.

### Miyaan noqon karaa waalid xanaaneeya rixinka haddii aan leeyahay taariikh danbi?

Lahaanshaha taariikh danbi toos ugama reebayso qof noqonaya waalid xaneeneeya. Dhamaan waalidiinta xanaanadu waa inay ka gudbaan baadhitaanka danbi oo ay ku jiraan faraha FBI. Mararka qaar, dibu eegis dheeriya oo taariikhda danbi ayaa loo baahan karaa.

### Miyaan noqon karaa waalidka xanaanada rixinka haddii aan lahaa kiis CPS ah?

Lahaanshaha kiis CPS ah toos ugama reebayso qof noqonaya waalid xaneeneeya. DCYF ayaa dibu eegi doonta taariikhdaada CPS oo qiimeynaysa in macluumaadku khatar galin karo badqabka cunuga.

Qof waayeela oo ku nool guriga xanaanadu waa inuu:

- Dhameystiraa baadhista Washington State Patrol (Roondada Gobolka Washington)
- Dhameystiraa faraha FBI

Dhalinyarada da'aha 16 iyo 17 ee qoysasku waa inay dhameystiran baadhitaanka Washington State Patrol (Roondada Gobolka Washington) ama faraha FBI haddii ay ku noolaayeen meel ka baxsan Washington saddexdii sanee u danbeeyey.

### Intee inleeg ayuu cunuga rixinkaygu joogi karaa gurigayga cunug daryeel ahaan?

Waxay ku xidhan tahay cunuga gaarka ah iyo xaalada waalidka. Cunugu wuxuu ku jiri karaa daryeelka dhowr maalmood ama dhowr bilood. Dhamaan caruurta daryeelka ku jirta, joogtayntu markasta waa ahmiyad. Joogtaynta cunuga waxa ku jira kusoo noqoshada guriga, korniinka, masuuliyada, ama daryeelka xanaanada mudada-dheer (xaalado kooban).

### Sidee ayey DCYF uga taageertaa waalidiinta caruurta nidaamka?

Nidaamka dibu-midowga ee la shaqeynta waalidka si wax looga qabto arimaha cunuga ku kalifay daryeelka si qoysku iskugusoo wada noqon karo. Caruurtu waxay u baahan yihiin daryeel badqaba, degan, tayo leh inta lagu jiro wakhtigan. Waxa muhiima u ah cunugu inuu ku xidhnaado qoyskiisa. Inta ugu badan caruurta waajahaysa daryeelka xanaanadu waxay leeyihiin wakhti joogto ah oo maxkamad u amartay qoyska waalidiintiisa. Caruurta iyo waalidiintu waxay u baahan yihiin inay yeeshaan xidhiidh joogto ah si ay iskugu xidhnaadaan ugana wada shaqeeyaan kusoo noqoshada cunuga ee guriga oo badqabta. Shaqaalaha cunugu wuxuu kaala shaqeyn doonaa adiga iyo waalidiinta cunugu inaad go'aamisaan goobta iyo wakhtiga kulanka qoyska. Maxkamadu waxay go'aamisaa heerka kormeerka iyo qorshaha wakhtiga qoyska (joogto ah iyo goobta). Shaqaalaha kiisak cunuga ayaa la shaqeyn doona daryeel-bixiyayaasha si loo hubiyo wakhtiga qoyska in maamuli karo oo uu daboolayo baahiyaha caruurta, waalidkood, iyo daryeel-bixiyayaasha caawinaya.

### Miyey caruurtu wadaagi karaan qolalka?
Inta ugu badan caruurtu way wadaagi karaan sariiraha. Waa inay lahaadaan sariir gaara oo caruurta kala jinsiga ah waxay kaliya wadaagi karaan qol haddii ay ka yar yihiin lix sano jir. Caruurta qaar ayaan wadaagi karin sariiraha qolka waayo baahiyo kormeer awgood. Kuwani waa xaalado kala duwan oo saameynaya awooda lagu wadaagayo qolalka. Kuwani waxay gaar u yihiin xaalada waxaana lala xalin karaa shaqaalaha cunuga. Caruurta da'da 6 iyo ka weyn waxay u baahan yihiin inay la wadaagaan qolka cunuga la jinsi ah. Xaaladaha qaar, waxa jiri kara ka dhaafka sharcigan iyadooy ku xidhan tahay duruufaha dhamaan caruurta.

### Waa maxay shuruucda ama shuruudaha qiijinta sigaarku?
Qiijinta sigaarka lagama ogola meelaha ay ku nool yihii xanaanada guryaha ama xarumaha daryeelka caruurta, ama gawaadhida loo isticmaalo qaadida caruurta. Dadka waaweyn waxay ku cabi karaan meel ka fog caruurta oo dibada ah.

### Waa maxay anshaxyada aan u haysto cunug rixin ku jira daryeelka xanaanada?
Lama ogola wax ciqaab jidheed ah. DCYF waxay xoojinaysaa anshax togan, oo abuuraya qaab-dhismeed iyo xuduudo, iyo yeelashada cawaaqib caadiya oo ay la socdaan naxariis iyo daryeel. Waxaad heli doontaa tabaar inta lagu jiro nidaamka qaababka haboon ee anshaxa. Waalidiinta xanaanada rixinka waxa lagu dhiirigalinayaa inay ka faa'idaystaan qaababka anshaxa, iyagoo ka caawinaya cunuga xalinta xirfadaha iyo awooda maamulida shucuurtooda. Waxa sidoo kale jira caawimo tababar socda markaad liisanka heshid.

### Miyeynu kaxaysan karnaa cunug rixinka ah fasaxa?
Haa, lakiin haddii safarku ka badnaado 72 saac ama laga baxayo wadanka waalidja xanaanada rixinku wuxuu u baahan doonaa ansixin shaqaalaha cunuga uu ka helo. Waxaa muhiima in daryeel-bixiyaha rixinku kala hadlo qorshayaasha safarka shaqaalaha si loo hubiyo in safarku aanu saameyn wakhtiga qoyska ama waajibaadk kale oo daruuri u ah cunuga ku jira daryeelkiisa.

### Miyaa cunugayga rixika lagaga tagi karaa dadka kale, sida cunug-haye, mudo wakhti kooban?
Haa, caruurta xanaanada waxa daryeeli kara dadka kale, daryeel-bixiyayaashu waa inay ahaadaan 16 jir. Baadhista CPR/ Gargaarka Degdega waxay daruuri u yihiin kuwa daryeelaya caruurta mudo joogto ah. Daryeelka nasashada ayaa sidoo kale u banaan qoysaska u baahan caawimo dheeriya. Waxa muhiima in daryeel-bixiyaha rixinku la yeesho xidhiidh wanaagsan shaqaalaha cunuga, isagoo ogeysiinaya baahiyaha cunuga iyo daryeel-bixiyaha rixinka.

### Yaa sharxi kara nidaamka liisanka oo i caawin kara mudada hawsha daryeelka cunuga rixinka?
Barnaamijka Caregiver Retention, Education and Support (Haynta Daryeel-bixiyaha, Waxbarashada iyo Caawimada, CaRES) wuxuu ku caawin karaa dhamaan wakhtiga hawlahaaga daryeelka xanaanada. CaRES ayaa sharxi kara nidaamka liisanka, sidoo kale.
Booqo: **https://alliancecares.org** ama iimayl udir **alliancecares@uw.edu** si aad waxbadan uga ogaatid!

## Mrkaan u diyaargaroobo inaan buuxiyo codsigayga daraasada guriga, yaan u diraa? Ama, haddii aan su'aalo ka qabo codsiga, yaan la xidhiidhi karaa?

**Gobolka 1: R1LicensingDivision@dcyf.wa.gov**
**Gobolka 2: R2LicensingDivision@dcyf.wa.gov**
**Gobolka 3: R3LicensingDivision@dcyf.wa.gov**
**Gobolka 4: R4LicensingDivision@dcyf.wa.gov**
**Gobolka 5: R5LicensingDivision@dcyf.wa.gov**
**Gobolka 6: R6LicensingDivision@dcyf.wa.gov**
**Kuhadlayaasha Isbaanishka: EspañolLicensingDivision@dcyf.wa.gov**

*DCYF ma takoorto waxayna usiisaa helitaan siman barnaamijyadeeda iyo adeegyadeeda, dhamaan dadka iyadoon loo tixgalin isirka, midanka, jinsiga, diinta, caqiiqada, xaalada guur, dhalashada, rabitaanka galmo, da'da, xaalad ciidan ama jiritaanka naafo jidheed, dareen ama maskaxeed.*

Haddii aad tahay qof naafo ah oo ka walaacsan xuquuqdaada laguugu siiyey Americans with Disabilities Act (Xeerka Ameerikaanka Naafada ah), fadlan ka eeg daabacaada Public Notice of Nondiscrimination (Ogeysiiska Dadweynaha ee Takoor La'aanta) (ADM_0026) wixi macluumaad dheeraad ah iyo tilmaamaha kusaabsan sida cabasho loogu gudbiyo onlaynka halkan **www.dcyf.wa.gov/publications-library/ADM_0026**.

*Haddii aad rabto nuqullo dukumeenti ah oo qaab kale ah ama luuqad kale ah, fadlan la xidhiidh DCYF Constituent Relations (Xidhiidhada Qaybaha DCYF) (1-800-723-4831 | 360-902-8060, **ConstRelations@dcyf.wa.gov**).*

DCYF PUBLICATION
LIC_0017 | CWP_0015 | DSHS 22-1493 SM
(09-2024) Somali